



Waa maxay Guri Isa Siinta kala Doorashada ku Saleysan?

Halkii dadka 'looga deeqi' lahaa hoy, ayey kooxda Kala Doorashooyinka Guriyeynta Magaalada London guryaha ku xayesiin doontaa bartaan internetka toddobaad kasta. Ka dibna dadku waxay diiwaan gelin karaan xiisaha ay hayaan guryaheenna iyagoo isticmaalaya habka 'araajida' ee khadka internetka ama khad telefoon oo faah faahinta lagu sii duubay.

Qorsheyaasha Guri Isa Siinta Kala Doorashada ku Saleysan waxaa si guul leh u isticmaalay xukaamado madani ah oo kale oo fara badan waxaana loo qaabeeyey in lagaaga caawiyo inaad noqoto mid in badan ku lug yeesha hawsha codsiga guriyeynta.

Haddii aad dooneysid in laguu tixgeliyo mid ka mid ah guryaha la xayesiiyey, waxaa lagaaga baahan yahay in lagugu qoro diiwaanka guriyeynta Magaalada London waana in loo meel mariyaa iney yihiin guriyeyn lagu deeqay.

Haddii Ingiriisku uusan ahayn luqaddaada koowaad aadna jeclaan lahayd turjumidda macluumaadka lagu soo bandhigay bogagga Guri Isu Siinta Kala Doorashada ku Saleysan, fadlan kooxda Kala Doorashooyinka Guriyeynta kula xiriir telefoonka 020 7332 1237 / 1654 / 1804 ama 3934 ama qof weydiiso inuu kuula xiriiro asagoo wakiil kaa ah.